

Cimilada
Suuqyada
Nafaqada
Beeraha
Xoolaha
**Arrimaha
Ka Soo
Shaacbaxaya
Gobollada**

Cinwaanka: FSAU - Somalia
Kalson Towers,
Parklands
Box 1230 Village Market
Nairobi, Kenya
Tilifoona: +254 20 374 5734
Faakiska: +254 20 374 5098
Email: fsauinfo@fsau.or.ke
www.unsomalia.net/fsau/

Hubinta Cuntada iyo Nafaqada

Warbixinta Kooban ee March 2005

Tilmaamaha

Horumarka Siyaasadda: Madaxweynaha cusub, Ra'iisal Wasaaraha iyo dhowr wasiir oo ka tirsan dawladda cusub ee loo doortay Soomaaliya ayaa dhameeyey 10 maalmood ah oo ay ku tageen Jowhar, Beledweyne, Gaalkacayo, Garoowe, Boosaaso, iyo Baydhaba todobaadkii u horreeyey bishan March. Horumarka sii socda ee laga gaadhayo dhismaha dawlad dalka gudihisa ka jirta ayaa dhiirigelin leh waxana ay si weyn u taaban doontaa hubinta cuntada hab nololeedka.

Cimilada: Badi dalka roob kama di'in bishii February taasoo la filayey (iyadoo lagu jiro badhtamaha xilliga Jiilaalka). Waqooyi Galbeed roobabka Todob ayaa ka billaabmay dhowrkii maalmood ee u danbeeyey February, taasoo muujinaysa billowga roobabka ka da'a *Guga* degmooyinkaas. Khubarrada cimilada ee ka qaybgalay Gole sannadeedka 15aad ee Muuqaalka Cimilada (March 1-5) waxay saadaalinayaan inay u badantahay in roobku uu ka hoosayn doono sida caadiga Guga 2005 (bogga 2).

Suuqyada: Shilinka Soomaaliya iyo ka Soomaaliland waxay ku wadeen inaanay sidaas isu bedelin labadii bilood ee la soo dhaafay, sarrifka Doolarka markaykanku wuxuu ahaa 15,500 Shilinka Soomaaliya (SOSH), Shilinka Soomaaliland (SLSH) wuxuu ahaa 6,100. Labada shilinba weli way ka hooseeyaan qiimihii sannadkii 2000 (Shilinka Soomaaliya wuxuu hooseeya 50% ka Soomaaliland wuxuu hooseeyaa 100%), laakiin tartiib ayuu qiijmahoodu u soo noqonayaa taniyo markii ay gaadheen halkii u hoosaysay qiimo jabka. Dalag dibedda laga keeno (baatroolka, sonkorta, saliidda cuntada lagu karsado iyo wixii la mid ah) waxay ku socdaan guud ahaan sidii hore sarrifka labada lacagoodba (bogga 2).


Nafaqada: Heerar aad u xun oo nafaqadarrada ah ayaa wali ka jira Dooxadda Jubba, ilaa 23% (Qiyaasta Dhexroorka Badhtamaha Cududda sare "MUAC" ka yar 12.5 oo senti mitir "cm"). In ka badan afartii meeloodba meel carruurta la badhaay waxay halis ugu jiraan nafaqadarro (MUAC 12.5-13.4 cm) (Jan. 2005). Baadhiitaanka degdegga ah ee nafaqada ee laga sameeyey gobolka Galgaduud (Harale iyo Balanbale) wuxuu muujinayaa heerar sare oo nafaqadarro aad u xun ah, oo u dhexeeya 19.5% ilaa 24% (MUAC ka yar 12.5cm) (Dec. 2005) (page 2).

Beeraha: Gurashada midhaha ee ka baxsan xilliga (sisinta iyo galayda) ee dooxooyinka Shabeelle iyo Jubba wali way socota waxana la filayaa inay sii socoto March iyo horraanta April, hase yeeshee, heerarka soosaarka way ka hooseeyaan sidii la filayey, taasoo ay keentay waxyeello ka timidi cayayaan, hawo kulul iyo qoyaan. Soosaarka hadhuudhka ee xilliga Deyrta ee suuqyada qiimuhu aad ayuu hoos ugu dhacay. Tani waxay keentay horumar weyn oo ah iswaydaarsiga ganacsiga (hadhuudhka iyo heerarka mushahaarada maalintii), taasoo korodhay 70% marka loo eego December 2004 (bogga 3).

Xoolaha: Daaqa ee dhaamman dhulku wuu ku filanyahay, inkasta oo lagu jiro badhtamaha Jillaalka. Xaaladda jidhka xooluhu way fiicantahay guud ahaanna hore ayay u maraysaa. Dhoofinta adhigu hoos ayay u dhacday 54% bishii February marka loo eego January, kadib dhammaadkii xilligii Xajka. Qiimaha adhiga teyada dhoofinta lehina hoos ayuu u dhacay baahida yaraatay darteed (bogga 3).

Arrimaha Ka Soo Shaacbaxaya Gobollada:

- Xoola-dhaqato badan oo ku jira **Gurmad Bina-aadamnimo goobo ka mid ah Waqooyiga** ayaan si buuxda uga faa'iidayan karin daaqa ku filan jiilaalka sababtoo ah xoolaha oo aad u yaraaday, heerarka deynta oo aad u sarreeya iyo iyadoo dad badani ay si xun u barakaceen (bogga 4).
- Dad lagu qiyaasay 22,000 qof oo ku nool xeebaha waqooyiga ayaa u baahan xoola-goyn 8da bilood ee soo socda, sida ay sheegayso Baadhiitaanka Hayaduhu u wadajireen ee Sunaamiga (bogga 4)
- Colaadda qabiilka oo ku sii korodhay **Luuq iyo Garbahaarray waxay sii xumaysay Gurmadka Bina-aadamnimada** ee ka jira degmooyinkaas, waxana ay qas ku ridday suuqyada iyo hab-nololeedka (bogga 4).



Roobka oo liitay kadib 3 sano oo abaar uu ahaa Waqooyigu. Goobo roobku uu liitay gobolada Dhexe iyo Koonfurta

Gurmadka bina-aadamnimada waxa lagu tilmaamay afar goobood

Roobab ka badan sida caadiga ah ayaa keenay in xoolo ay dhinteen meelaha ay abaartu saamaysay ee Waqooyigalbeed waxana ay kordhiyeen halista ka imanaysa inay daadad ka dhacaan Koonfurta.



Roobab ka badan kuwa caadiga u ah Deyrta oo ka da'ay badi dalka ayaa keenay soo saar midhaha ah oo ka badan celceliska horena u mariyey xaaladda xoola-dhaqatada.

Cimiliada

Badi dalka roob kama di'in bishii February, taasoo caadi ah maaddama lagu jiro xiliga jiilaalka. Sida caadiga ahna roob yar ayaa da' ama maba da'o roob bishan (Khariidadda 1).

Goobo ka mid ah koonfurta, gaar ahaan dooxada Jubba, ayuu ka da'ay roob, kaasoo hore u mariyey xaaladda soosaarka midhaha qaybo ka mid ah degmada Bu'aale (Gobolka Jubbada Dhexe). Waqooyi Galbeed, roobab todob ah ayaa ka billaabmay dhowrkii maaljood ee u danbeeyey February, taasoo muujinaysa billowga Guga.

Kubarada cimiladu waxay saadaalinayaan roobab xoogaha ka yar sida caadiga ahi inay di'i doonaan Guga 2005. Khubarrada cimilada ee ka qaybgalay Gole sannadeedka 15aad ee Muuqaalka Cimilada (March 1-5, 2005) waxay go'aan ku gaadheen inay u badantahay in roobab sida caadiga ah ka yari ay ka di'i doonaan Soomaaliya Guga 2005 ee soo socda. Waxa dhici karta 40% in roobabka Gugu ay caadi noqdaan iyo 35% in ay ka hoosayn doonaan sida caadiga ah (Khariidadda 2). Roobabka Gugu waxay wax ka taraan ilaa 70-75%



isku-darka soosaarka cuntada iyo cowska ee sannadkii, sidaas darteed aad ayay muhiim ugu yihiin hubinta cuntada guud ahaan. Haddii roobabka Guga 2005 ay ka hooseeyaan sida caadiga ah waxay dib u celinaysaa soo kabashada xadidan ee lagu guulaystay kadib roobabkii Deyrta ee aadka u fiicnaa.

ssuusqyada - cimilada - nafaqada


Suuqyada

Shilinka Soomaaliya (SOSH) iyo ka Soomaaliland ismay bedilin marka loo eego Doolarka Maryakanka labadii bilood ee la soo dhaafay (January iyo February 2005). Qiimuhu sarrifka doolarku wuxuu u dhaxeeyey 15,900 iyo 15,400 SOSH, qiimaha SLSH wuxuu u dhaxeeyey 6,020 iyo 6,150. Shilinka Soomaaliya wuxuu qiimihiisu kor u kacay illaa 4% bishii February marka loo eego January, Shilinka Somaliland wuxuu hoos u dhacay 2% isla mudaddaas (Tusmada 1).

Labada lacagoodba wali qiimahoodu wuu ka hooseeya halkii ay joogeen 2000, qiime jabku waa ilaa 50% SOSH iyo 100% SLSH. Hase yeeshee guud ahaan sida ay u socdaan labada lacagoodba waxay u muuqdaan inay tartiib qiimahoodu soo ceshayaan taniyo markii ay gaadheen heerarka u sarreeya ee qiime-jabka. SOSH wuxuu gaadhy halka ugu sarraaysa ee sarrifka doolarka 23,500 bishii October 2001, iyadoo SLSH uu gaadhay sarrifka heerka ugu sarreeya bishii July 2003 markaas oo lagu sarrifay doolarka 7,870 (Tusmada 1).

Dalag dibedda laga keeno sida sonkorta, saliidda wax lagu kariyo, bariiska iyo shiidaalku waxay xidhiidh dhow la leeyihiin heerka sarrifka lacagta. Tusaale ahaan, dooxada Jubba qiimaha badi dalagga dibedda laga keeno si weyn buu u kordhay kadib markuu qimo jabay SOSH, laakiin hoos ayuu u dhacay markii shilinka qiimihiisu uu kordhay. Waxa la filayaa in qiimaha dalagga dibedda la keenaa uu tartiib hoos ugu dhaco badi suuqyada haddii laba lacagood ay ku wadaan in qiimahoodu uu kordho.

Tusmada 1: Isbedelka Shilinka Soomaaliya ee Suuqa Muqdishu, February 2005




Nafaqada

Gaalkacayo: Adeegyada kooban ee ay haystaan carruurta ay nafaqadarradu hayso ee Soomaalia waxay ku khasbeen goysaska haysta carruur ay nafaqadarro aad u xumi hayso inay meelo fog uga yimaadaan Gaalkacayo iyagoo raadinaya daryeel caafimaad. Waxa la arkay in carruurta la dhigo Xarumaha Daaweynta iyo Quudinta ay sii kordhayaan (51 September 2004 waxay gaadhay 176 December 2004). Tirada carruurta ku geeriyootay Xarumaha Daaweynta iyo Quudinta ee la diiwaangeliyey waxay ahayd 21 bishii January 2005.

Galgaduud: Baadhitaanka degdegga ah ee nafaqada ee laga sameeyey tuulooyinka Haraale iyo Balanbale ee gobolka Galgaduud bishii December 2004 waxay muujinayaan nafaqa-darro aad u xun oo heerkeedu uu aad u sarreeyo (MUAC oo ka yar 12.5cm or oedema) of 19.5% and 24% respectively.

Dooxada Jubba: Baadhitaan Degdeg ah oo FSAU ku samaysay magaalada Badhadhe (January 2005) iyadoo la isticmaalayo MUAC waxay muujinaysaa iskudar heerka nafaqa-darro aad u xun oo u heerkeedu yahay ilaa 23% (MUAC ka yar 12.5 cm) iyo in ka badan afartii meeloodba meel carruurta la cabiray waxay halis ugu jiraan nafaqa-darro (MUAC 12.5-13.4 cm). Warka la soo ururiyaa wuxuu muujinaya in ay ku sii bateen Badheedhe cudurrada sida shubanka, kanecada, ARI, caabuqa maqaarka iyo gooryaanka gala xiidmaha. Dad qaba kaadi-dhiig ayaa la soo sheegay. MCH tirada dadka tagaa xoogaha ayay hoos u dhacday taniyo September 2004, laakiin tani badi waxa u sabab ah iyada oo ay dhammaadeen qaar ka mid ah dawooyinkii iyo tallaaladii xarumahaas laga bixinayey.

Khariidadda 3: Xaaladda Guud ee Nafaqada




Beeraha

Soosaarka galayda iyo sisinta xilliga aan caadiga ahayn ee gobollada Shabeellooyinka iyo Jubbooyinka waxa la filayaa inuu ka yaraan doono sidii la rajaynayay waxyeello ka timi hawo kulul, cayayaan iyo dhedo darteed.


Shabeelle, sisinta dheeraadka ah ee roobka ku baxday ayaa la guranayaa, laakiin guud ahaan soosaarka waxa la filayaa inuu ka yaraado sidii la rajaynayay. Sisinta hore loo beray gaar ahaan sisinta la waraabiyo, waxa waxeeylo gaadhsiiyey cayayaan jooga meelaha dhedadu ku badantahay January iyo horraantii February. Beeralaydu waxay isku dayeen inay midho kala geddisan wakhtiyada kala duwan beeraan laakiin kumay guulaysan. Sisinta mar dambe la beeray waxa la sheegay inay si fiican u baxday meelaha qaar. Goobaha, gallyayda dheeraadka ah ee hadda taagan, gaar ahaan meelaha mashaariicda waraabinta laga helo, xagga horumarka waxay marayaan heerar kala duwan, si fiicana way u baxayaan. Wanle-weyn guridda hadhuudhka roobka ka u baxay (midhaha ugu muhiisan degmadaas) way socotaa waxana la arkaa hadhuudh badan oo la toomiyey si uu cadceedda ugu qalalo. Qiimaha hadhuudhka casi waa ilaa 1,500 SOSH/kg, gallyayduna waa 2,500 SOSH/kg.

Dooxada Jubba, gurashada gallyayda iyo sisinta dheeraadka ahi way socotaa, laakiin soosaarku wuu ka yarayahay sidii la filayey sababtoo ah waxyeello badan oo ka timi cayayaan iyo dhedo. Midhaha ku baxaya dasheeggu waxay joogaan heerar kala duwan beeralayduna waxay ku wadaan inay ka beerayaan galay meelaha qaar biyuhu ay gudheen. Beeralaydu hada ka kadib kuma beerayaan sisinta meelaha biyuhu fadhiyaan, maaddaama ay halis meelahaasi ugu jiraan inay xumaadaan midhuhu marka ay da'aan roobabka Gugu billowga April.

Xilliga Deyrta hadhuudh ka baxay Bay, Bakool, Gedo iyo Hiraan ayaa suuqyada yaalla, oo keenay inuu qiimuhu aad u jabo (Tusmada 2). Dadka saboolka ah, qiima-dhaca hadhuudhka wuxuu u keenay horumar weyn oo isweydaariga ganacsiga ah, sida mushahaarada maalintii waxa iminka lagu beddeshaa 21 kgs oo hadhuudh ah, taasoo korodhay 70% marka loo eego



Tusmada 3: Isweydaarisa Ganacsiga ee ka dhedhexeeya Midhaha iyo Shaqada (Isku-darka guud ee suuqyada)




* Suuqyada Waqooyi Bari - Boosaaso, Garboowe; Suuqyada Waqooyi Galbeed - Boorame, Burco; Suuqyada Jubba - Armadow, Bu'aale, Dhoobley; Goobaha Hadhuudhka - Baardheere, Beledweyne, Xuddur, Baydhaba; Suuqyada Shabeelle - Afgooye, Merka, Jowhar.

December 2004 (Tusmada 3). Fursadaha shaqada Beeruhu way fiicanyihiin iyadoo ay socoto hufidda hadhuudhka, guridda galayda iyo sisinta, wax beerid iyo goynta dhirta aan loo baahnayn.

Xoolaha

Xaaladda guud ee daaqa iyo biyaha ee dhammaan Soomaaliya wali way ku filantahay, inkastoo lagu jiro Jiilaal. Guud ahaan xilligan Jiilaalku wuu u sahlanyahay xoola-dhaqatada marka loo eego xilliyadii jiilaalka ee hore. Xaaladda jidhka xooluhu waxa la sheegay inay wanaagsantahay saadka daaqa ee hore u maray dartiis.

Goobaha uu ka jiro Gurmadka Bina-aadamnimada ee waqooyiga, xoola-dhaqato badani uma eka inay ka faa'iidayanayaan daaqaas wanaagsan sababtoo tirada xoolaha oo aad u yaraaday taasoo si xun u taabatay ka soo kabashada xoolaha iyo hab-nololeedka ee xoola-dhaqatada. Guud ahaan sida ay u yaraadeen awrta rarada ahi waxay xaddidaysaa dhaqdhaqaaqa reer guuraaga waxana ay ku khasbaysaa dad badani inay joogaan tuulooyinka biyaha laga helo agtooda. Taasina waxay culays weyn saaraysaa saadka daaqa ee ku hareeraysan goobaha biyaha laga helo. Caanaha riyaha waxa la sheegay inay jiraan siina kordhayaan, laakiin soosaarka kale ee laga helo xoolaha, sida caanaha geela ayaan weli le helin meelaha qaar. Marka la eego tirada badan ee ka dhimatay geela (ilaa 80%) caanaha geela lama filayo in la helo ilaa dhammaadka 2005 marka uu geelo



dhalo. Waqooyi Galbeed roobabka Todob ayaa ka bilaabmay dhowrkii maalmood ee ugu dambeeyey February, taasoo muujinaysa billowga Guga.

Toddobaadkii labaad ee February xoolo markii hore ka guuray degmada Shiniile ee gobolka Soomaalida ee Itoobiya ayaa ka tegay xeebaha gobolka Awdal oo ku laabtay dhulkoodii. Taasi waxay fududaysay culayskii saarraa daaqa iyo biyaha Awdal. Xaaladda jidhka xoolaha iyo dhalmada xoolaha Awdal rajo fiican ayaa laga qabaa. Dhalmada geelu hore ayay u bilaabantay adhiguna way dhalayaan. Hormarkaas wanaagsan dartiis, soosaarka caanaha iyo suuqeynta xooluhu waxa la sheegay inay caadi tahay.

Badhtamihi February waxa da'ay roobab ku koobnaa qayb ka mid ah Saakow iyo seeraha koonfurta iyo galbeedka Bu'aale, Koonfurta Soomaaliya. Inkastoo saadka biyaha iyo daaqa hore u maray, haadana badi degmooyinka waxa ka jira kulayl, roob-la'aan, iyo dabaylo la xidhiidha Jiilaalka. Xoola-dhaqata degmooyinka Bu'aale, Xagar, iyo Saakow waxay u gurayaan meelo saadka biyuhu ka fiicanyahay. Degmada Xagar, tusaale ahaan, culayska la saaray saadka daaqa iyo biyuhu wuu sii kordhaya, Helitaanka iyo qiimaha caanaha ee degmooyinkaasi waa caadi.

Sidii la filayey, xoolaha laga dhoofiyo dekedaha Berbera iyo Boosaaso hoos ayay u dhacayaan kadib dhammaadkii Xajka oo ay badnaayeen. Adhi dhan 60,556 ayaa laga dhoofiye dekedda Berbera, Boosaasana adhi dhan 70,834 bishii February. Tiradani waxay ka dhigantahay hoos u dhac 54% adhigii la dhoofiyeey January. Lo'da laga dhoofiye dekedda Berbera hoos ayay u dhacday. January waxa laga dhoofiyeey tiro dhan 4,695 iyadoo tirada la dhoofiyeey February ay ahayd 11,303 (hoos u dhac 23%). Xoolaha laga dhoofiyeey Boosaaso waxay ka kordheen 5,218 waxanay gaadheen 8,658 (hor u kac 66%). Geel lagama dhoofin bilihii January iyo February, Berbera. Boosaaso waxa laga dhoofiyeey 19 iyo 128 geel ah mudadaas (Tusmada 4). Qiimaha adhiga teyada dhoofinta lehi hoos ayay u dhaceen isla mudadaas kadib hoos u dhaca baahida loo qabo xoolaha la dhoofiyo.

beeraha - xoolaha

Falanqaynta Dhamaystiran ee Hubinta Cuntada: Arrimaha Gobollada ee soo Shaac-baxaya

Gobolka Waqooyi-galbeed

Ayaa ayaa laga soo sheegay xeebta waqooyiga ee Karin (120 km ayay beriga ka xigtaa Berbera). Habka Gurmadka ah ee Isaga Gudbuka Soohdimaha ee Xoolaha Duur-Joogta ah, Cayayaanka iyo Cudurrada (EMPRES) ee Magaalada Hargaysa ayaa qorshaynay inay booqasho ku tagaan si ay u qiimeeyaan waxyeellada ayaxaas. Culays lagu hayey saadka daaqa ee xeebaha Awdal ayaa fududaaday kadib markii xoolo ka soo guuray degmada Shiniile ee gobolka Soomaalida ee Itoobiya ay ku laabteen dhulkoodi badhtamihii February.

Gobolka Waqooyi-bari

Inkastoo lagu jiro Jiilaal, daaqa iyo biyaha badi degmooyinku way wanaagsanyihiin. Hase yeeshee xoola-dhaqato badan ayaanay u suurtoobayn inay si buuxda uga faa'iidaystaan sababtoo ah xoolaha oo yaraaday, heerarka deynta oo sarreeya, hanti la'aan iyo barakac.


Baadhiitaan ay hayaduhu Sunnaamiga ku saameeyeen wuxuu ku qiyaasay in 22,000 qof xeebaha uu Sunnaamigu ku saameeyey oo ay u baahanyihiin xoola-goyn 8da bilood ee soo socda. Meelaha uu Sunnaamigu saameeyey waxa ka mid ah Xaafuun, Bender Beyla, Kulub iyo Dharin Raqas.

Gobolka Hiiraan

Samafalka bulshada ee gobolku waxay maraysa halkii ugu sarraysay sababtoo ah deeqda Sakada ee laga bixinayo hantida ama lagu bixinayo lacag naqad ah. Beeralayda ladani midhihi u go'ay 10kii meeloodba meel waxay ugu deeqeen Sako ahaan kooxaha saboolka ah. Qiimaha midhuhu hoos ayuu u dhacay sababtoo ah midho badan ayaa laga gurtay beeraha Deyrtii koonfurta iyo gobolka Soomaalida ee Itoobiya.

Gobolada Bay & Bakool

Nabad la'aantu waxay ku waddaa inay qasto hab-nololeedka xoola-dhaqatada iyo xoolo iyo beer dhaqatada qaybo ka mid ah Bakool. Guuridda xoolaha oo aan caadi ahayn ayaa laga soo sheegay Raddhuure iyo Ceel-Barde. Hadhuudhku suuqyada ayuu yaalla qiimihiisuna hoos ayuu u dhacayaa. Taasoo u keenaysa horumar weyn iswaydaarsiga ganacsiga ee ka dhexeeye adhiga iyo hadhuudhka iyo shaqada iyo hadhuudhka.



FURAHA: HABKA LOO QAYBIYEEY

- Gurmad bina-aadmimo (heerka 1)
- Gurmad bina-aadmimo (heerka 2)
- Cidhiidhiga hab-nololeedka oo halis ah feejignaan
- Feejignaan maaha, aad bayse u nugulyihiin
- Xaalad adag (hubin la'aan cuntada ah oo si joogta ah u jirtay in ka badan 3 sani
- Goobaha leh Dad Gudaha Dalka ku Barakacay

Khariidadda waxa laga soo qaatay: Warbixinta FSAUA ee Taxanaha ah lambar IV.3, March 2005

Gobollada Dhexe

Xilliga Jiilaalka dartiis, xooluhu waxay ka tuurayaan koonfurta iyagoo u guraya degmooyinka Jarriban iyo Goldogob ee waqooyiga Mudug. Kooxo ku dagaalamaya gobolkaasi ayaa ku heshiiyey xabad-joojin aanay shuruudi ku xidhnayn, in la kala fogeeyo kaooxha malayshiyada iyo in la magaacbo guddiyo labada dhinacba si ay u galaan waan waan nabadeed.

Gobolada Shabeellooyinka

Webiga Shabeelle wuxuu joogaa halkii ugu hoosaysay, taasoo xaddiday waraabinta degmooyinka Jannaale, Qoryoolay iyo Kurtunwaarey (Shebeelada Hoose) iyo sidoo kale Jowhar (Shabeelada Dhexe). Midhuhu si weyn ayay u yaraadeen dabaylo kulul iyo cayayaan dartood. Nuurad iyo 6000 MT oo dhuxul ah in laga dhoofiyey dekedda Ceel Macaan ayaa la soo sheegay. Taasoo muujinaysa dhibaato dheeraad ah oo loo gaysanayo cimilada dooxada Shabeelle iyo gobolka Bay.

Gobolka Gedo

Xoolo iyo beer dhaqatada ee saboolka ahi waxay ku heleen Sako ilaa 3-5 jawaan oo hadhuudh ah iyo 2-3 neef oo adhi ah. Heerarka biyaha webiga Jubba ee Gedo hoos ayay u dhaceen February marka loo eego January. Colaadda qabiilka ayaa ku sii korodhay degmooyinka Luuq ilaa Garbaharey oo keentay inay qasmeen suuqyada iyo howlaha kale ee gobolka..

Gobolada Jubbooyinka

Galay iyo sisin xilliga aan caadiga ahayn oo badan ayaa la soo sheegay inay waxyeello ka soo gaadhay cayayaan. Waxa la soo sheegay in xooluhu ay guur gurayaan iyagoo raadinaya biyo iyo daaq gaar ahaan degmooyinka Salagle, Nusduniya, iyo Basra. Nabad la'aantu way sii xumaatay shilalka afduubidda baaburta, dhaca iyo toogashaduna way ku sii kordheen degooyinka Bu'aale iyo Xagar.

Websaytka FSAU: Websaytka FSAU waxa la bilaabi doonaa toddobaadka u horreeya April (www.fsau.somalia.org).

Warbixinaha: Warbixinta FSAU ee Falanqaynta Deyrta, Taxanaha Farsamada Lambar IV.3, March 2, 2005.
Warbixinta Hay'aduhu Baadhitaan ay ku sameeyeen Sunaamiga - Xaafuun ilaa Garacad, Waqooyiga Bari ee Soomaaliya waxa la soo saarayaa toddobaadka labaad ee March 2005.

Tababarrada: Kooxda Nafaqada ee FSAU Tababar Teyodhis iyo Qorshaynta ah ayay ku yeesheen Nayroobi 21kii February -7dii March 2005

** Hay'adaha waxa lagu dhiirrigelinayaa gudbinta warka ku saabsan warbixinaha, baadhitaannada iyo tababarrada si halkan loogu soo shaacbiyo **

arrimaha ka soo shaacbaxaya gobollada



Technical and Managerial Support



Funding Agencies



Technical Partners



Save the Children UK

